baaritaanka uurka ee kaadida si loo hubiyo in heerarka hoormoonka uurku uu hoos ugu dhacay heerar aan uur jirin.

**Aad bay muhiim u tahay haddii aad yeelato xanuun, calool laaqid, suuxdin, xanuun marka xiidmuhu furmaan ama aad xanuunka ka dareento caarada garabka, waa inaad sida ugu dhakhsaha badan u timaaddaa qeybta gurmadka degdega ee isbitaalka. Waa inuu ku arko dhakhtar takhasus leh (dhakhtarka dumarka).**

## *Waa maxay fursadaha aan ku yeelan karo uur ektoobiga?*

Nasiib wanaag, dadka intooda badan markii hore lagu sheegay inay leeyihiin Uur Meel aan La Aqoon ku Samaysmay may yeelan uur ektoobiga. Qiyaastii boqolkiiba 10% dadka ayaa marka dambe lagu ogaan doonaa uurka ektoobiga.

## *Haddii uurkeygii uu fashilmay, ma waxay ka dhigan tahay inaanan yeelan uur ektoobiga?*

Kiisaska Uur Meel aan La Aqoon ku Samaysma badankoodu, meesha dhabta ah ee uurka marna lama ogaado. Badankoodu waxay ku fashilmaan uur-ku-jirka (ilmo-galeenka) - oo sidoo kale loo yaqaan dhicis. Waxa kaliya oo suurtogal noqon karta in la ogaado uurka ektoobiga ee fashilmay haddii baadhitaan ultrasound ah lagu celiyo, laakiin tan badiyaa looma baahna marka la eegayo dhinaca daryeelka caafimaadka.

## *Dareenkaaga*

Ogaanshuhu wuxuu noqon karaa waqti walaac leh. Sidoo kale culeyska jirka ee ay keenayaan booqashooyinka isbitaalka ee isdeba-jooga iyo baaritaannada, waxaa laga yaabaa inay kugu adkaato inaad si dareen leh ula heshiiso waxa kugu dhacaya. Dadka badankood, markay la kulmaan dhacdo adag, waa jawaab dabiici ah inay isku dayaan inay macno u sameeyaan waxa dhacaya. Iskudayga inaad fahanto baaritaannada kala duwan iyo sababta aan weli loo hayn jawaab sugan waxay noqon kartaa jahawareer. Waxay noqon kartaa wax laga xumaado in la waayo jawaabo sidoo kale laga walwalo waxa dhici kara.

## *Dareenka lammaanahaaga*

Welwelka ku xeeran Uurkaaga Meel aan La Aqoon ku Samaysmay ayaa sidoo kale saamayn kara lammaanayaasha. Iyaga oo isku dayaya inay ka baaraandegaan waxa ku dhacay naftooda, waxay isla markaa isku dayi karaan inay ku siiyaan taageero ka dib markay arkaan dhibta jidheed iyo shucuureed ee aad martay..

Lammaanahaaga ayaa laga yaabaa in uurku uusan saamayn. Waxaa laga yaabaa inay isku dayayaan inay wax ka qabtaan falcelintooda shucuureed ee ku saabsan jahawareerka iyo inay markhaati ka noqdaan welwelkaaga. Dadka qaar, waxaa laga yaabaa in ahmiyadda lammaanuhu adiga uu yahay halkii uu ka ahaan lahaa uurkii lumay taasina waxay noqon kartaa meel la isku afgaran waayo. Mararka qaarkood lammaanahaaga ayaa laga yaabaa inay ku adkaato inuu fahmo dareenkaaga waxaadna u malayn kartaa in lammaanahaagu uusan ku taageerayn sidii aad jeclaan lahayd. Lammaanayaashu waxay isku dayi karaan inay "wax hagaajiyaan" ama waxay rabi karaan inay ka fogaadaan ka hadalka waxa dhacay ama soo hadal qaaditaanka mowduuca xanuunka badan. Sababtu maahan inaysan danaynayn laakiin waxay rabaan inay "wax hagaajiyaan". Iyada oo inta badan ahmiyadda adiga lagu saarayo, waxay sidoo kale dareemi karaan in laga tegey oo la iska indho tiray.

Waxaa muhiim ah, marka aad dareento inaad awooddo, inaad lammaanahaaga kala hadasho dareenkaaga iyo dareenkooda labadaba. Waxaan sidoo kale halkan u joognaa inaan ka taageerno lammaanayaasha welwelka Uur Meel aan La Aqoon ku Samaysmay.

## *Sidee Hay'adda Uurka Ektoobigu u bixin kartaa taageero*

Hay'adda Uurka Ektoobigu waxay siisaa macluumaad iyo kaalmo kuwa la kulma dhibaatooyin iyo fashilaado inta uu uurku cusub yahay, ee ay keenaan Uur Meel aan La Aqoon ku Samaysmay iyo uur ektoobiga.

Markay timaaddo Hay'adda Uurka Ektoobiga, in badan oo naga mid ah waxay soo mareen dhaawac jireed iyo mid shucuureed oo uu sababay uurka ektoobigu sidaa darteed waan fahmaynaa oo u damqanaynaa sida adiga iyo kuwa aad jeceshahay dareemaysaan hadda. Waxaa laga yaabaa inaad dareento cidlo, wareer, iyo culays. Waxaa laga yaabaa inaad qabtid su'aalo ku saabsan waayo-aragnimada iyo waxa dhici doona, jir ahaan iyo dareen ahaanba. Waxaan halkan u joognaa inaan ku taageerno. Boggayaga internet-ka waxa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dhinacyada jirka iyo shucuurta ee PUL iyo uurka ectopic. Degelka waxa ku jira xog caafimaad oo saxa sidoo kale waxaa ku jira macluumaad ku saabsan adeegyadayada taageerada kala duwan halkaas oo aad nala wadaagi karto khibradahaaga su'aalana na weydiin karto. Haddii aad u malaynayso inaan ku caawin karno, fadlan booqo degelkeena, iimayl noo soo dir ama na soo wac.

Fadlan booqo ectopic.org.uk si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo taageero.

Somali

# Uur ku Samaysma Goob aan La Aqoons

## Pregnancy of Unknown Location

The Ectopic Pregnancy Trust

Publication date: November 2021

Website: **ectopic.org.uk**
Helpline: **020 7733 2653**
Email: **ept@ectopic.org.uk**

Registered with FUNDRAISING REGULATOR

Registered charity number:1071811

For healthcare professionals: To request further leaflets, please contact leaflets@ectopic.org.uk or call 020 7096 1838 or text to 07537 416085

The Ectopic Pregnancy Trust

Waan ka xunnahay in xirfadlahaaga daryeelka caafimaad uu kugu wargeliyey inaad leedahay Uur aan la garanayn meesha uu ku samaysmay.

Waxay noqon kartaa waqti dareen ahaan adag oo waxaa laga yaabaa inaad qabtid su'aalo ku saabsan Uurkaaga Meesha aan La Aqoon ku Samaysmay. Warqaddan, waxaan isku dayi doonnaa inaan kaga hadalno qaar ka mid ah su'aalaha inta badan la is weydiiyo.

Waxaad macluumaad dheeraad ah iyo taageero ka heli kartaa halkan www.ectopic.org.uk.

## Waa maxay Uurka Meesha aan La Aqoon ku Samaysmaa?

Waxaa laga yaabaa in laguu aqoonsado inaad leedahay Uur aan La Aqoon Meesha uu ku Samaysmay marka lagugu sameeyo baaritaanka ultrasound ee la dhex mariyo xubinta taranka (halkaas oo la dhexgeliyo kamarad gudaha xubinta taranka) sawirkuna uu soo saari kari waayo uurka.

Haddii uur aan lagu arki karin gudaha ama dibadda ilma -galeenka (makaanka), ama haddii sawir-qaaduhu uusan hubin, waxaad maqli kartaa in xaaladdan lagu tilmaamo Uur Meel aan La Aqoon ku Samaysmay, ama (waxa af-Ingiriisiga loo soo gaabiyo PUL). Waxaa muhiim ah in la fahmo in PUL aysan ahayn ogaanshe cudur; waa calaamad la bixiyo ilaa laga xaqiijinayo halka saxda ah ee uu ku jiro uurku. Waxa kale oo muhiim ah in la ogaado in sociddan macnaheedu aanay ahayn inay jirto uur ektoobiga, maadaama PUL sidoo kale ay ka mid yihiin uurar caafimaad qaba oo markii hore aad u yaraa si loogu arko ultrasound iyo sidoo kale uurar fashilmay oo yari darteed aan loo arkin.

Haddii ay dhacdo PUL, dhiig ayaa la qaadi doonaa si loo cabbiro hCG (Isla hormoonka laga baaro kaadida gabadha uurka leh) iyo hormoon kale oo xidhiidh la leh uurka oo la yiraahdo progesterone. Baadhitaanka hCG waxaa laga yaabaa in lagu celiyo 48 saacadood ka dib iyadoo ku xiran natiijooyinka ugu horreeya, tanina waxay ka caawin doontaa dhakhaatiirta inay qorsheeyaan haddii loo baahdo in lagu celiyo baaritaanka ultrasound si loo garto meesha uu ku jiro uurku.

Sababta tan ayaa ah ilaa meesha uurka si dhab ah loo ogaado, ama heerarka hoormoonku ay hoos uga dhacaan heerarkii uurka, waxaa jira halis ah dhibaatooyin la xiriira uur ektoobiga oo aan weli la aqoonsan. 100 uur oo kasta oo markii hore lagu tilmaamay PUL, qiyaastii 12 ayaa noqda ektoobig. Muhiimad ahaan, 12 -kan, qaarkood uma baahna wax daaweyn ah. Dhakhaatiirtaadu waxay kaala hadli doonaan ikhtiyaarada daaweynta ee suurtogalka ah.

Dhammaan PUL waa la dabageli doonaa ilaa meesha ugu dambaysa ee uurku kujiro la xaqiijiyo in uu yahay ektoobig, ama gudaha ilma galeenka. Mararka qaarkood meel lama xaqiijin karo, taas oo ah sababta baaritaannada heerka hormoonku ay u sii socon karaan muddo dheer.

## Waa maxay sababaha lagugu sheegayo in aad leedahay Uur ku Samaysmay Meel aan La Aqoon?

Waxaa jira afar sababood oo waaweyn oo laguugu tilmaami karo inaad leedahay Uur ku Samaysmay Meel aan La Aqoon:

1. Waxaa laga yaabaa inay goor hore tahay inaad uurkaaga ku aragto sawir Baaritaannada uurka ee kaadida ayaa hadda aad u fiican qaarkoodna xitaa waxay sahlaan in uur la ogaado inta aan caadada la waayin. Si kastaba ha ahaatee, uur ma noqon karo mid si kalsooni ah loogu arki karo
   - sawir ilaa lix toddobaad ka dib markii caadada la waayo sidas awgeed waxay noqon kartaa
   - goor hore si wax loo arko.

2. Waxaa laga yaabaa inaad hore u dhicisay uurka
   - Haddii aad la kulantay dhiig -bax culus, oo la mid ah caadada ama ka culus, waxaa laga yaabaa inaad
   - horaba u dhicisay oo aannu uur kuba jirin ilmo-galeenka.

3. Waxaa laga yaabaa inaad yeelatay uur ektoobiga, kaas oo laga yaabo inay goor hore tahay si loogu arko sawir
   - Uur ektoobig ahi waxay uu dhacaa marka ugxanta (ukunta) la bacrimiyey ay qabsato ( ku dhegto) meel ka baxsan ilmo-galeenka (makaanka). Sida uur ilmo -galeenka ku jira oo bilowa, waxaa laga yaabaa inay goor hore tahay in uur ektoobiga lagu arko sawir.

4. Waxaa laga yaabaa inaad yeelatay uur ektoobiga oo aan lagu arkin sawirka burooyin awgood
   - iyo aragyo xun.

## Sidee dhakhaatiirtaydu u gaari doonaan ogaanshaha kama dambaysta ah?

Tani waxay ku xirnaan doontaa siyaasadda maxalliga ah ee Qaybta Uurka Hore (EPU), rugta ultrasound ama isbitaal.

Guud ahaan, waxay noqon doontaa in la sameeyo badhitaanno dhiigga ah iyo suurtogalnimada in lagu celiyo baaritaanka ultrasound (sawir).

Dhakhaatiirtu waxay u isticmaali doonaan badhitaannada dhiigga si loo cabbiro mid ama laba hormoon: hormoonka uurka oo loo yaqaan gonadotrophin chorionic gonadotrophin (hCG) iyo sidoo kale mararka qaarkood progesterone. Unugyada qaarkood waxay cabbiraan heerarka labadan hoormoon hal mar kuwa kalena waxay qaadi doonaan laba heer oo hCG iyaga oo u dhaxaysiinaya 48 saacadood.

Hormoonka hCG waxaa la soo saaraa inta uu jiro uur waxana soo saara mandheerta koraysa iyadoon loo eegayn meesha uu uurku ku yaallo. HCG waxaa marka ugu horreysa lagu ogaan karaa baaritaanka dhiigga qiyaastii 11 maalmood kadib rimista, uur caafimaad qabaana, wuxuu caadi ahaan kordhaa inta u dhaxaysa 8-da ilaa 11-ka toddobaad ee ugu horreeya uurka, ka dibna hoos bu u dhacaa inta ka dhiman uurka. HCG ayaa keena 'jirro subaxeedka' dumarka qaar dareeman xilliga uu uurku cusub yahay. Progesterone waa hormoon uu sameeyo corpus luteum cyst, kaas oo ku samaysma ugxan-sidaha marwalba oo ugxan lasoo saaro. Haddii aan uur la qaadin, progesterone waxaa la sameeyaa oo kaliya laba toddobaad, ka dib markaas corpus luteum uu baaba'aa, caadada iyo wareeg cusub ayaana bilaabma. Marka uur la qaado, buradan soo daysa hoormoonkan ayaa lagu dhiirigeliyaa in ay sii joogto oo sii wado sii deynta progesterone 13-ka toddobaad ee ugu horreeya uurka.

HCG iyo progesterone waxaa loo isticmaalaa in ay hagaan maareynta PUL. Progesterone waxa ay dhakhaatiirta qaarkood cabbiraan booqashada ugu horreysa, halka hCG la cabbiro booqashada ugu horreysa kadibna inta badan 48 saac kadib. Hoos u dhaca progesterone iyo hCG waxay tilmaami karaan in uurku uusan sii koraynin, ama in uurku nasiib darro horeba/u dhintay dhicis ahaaan.

Progesterone sare iyo natiijooyin si caadiya u kacaya oo hCG ah waxay la xiriiraan uur weli jira, xitaa haddii aan lagu arki karin uurka sawir. Xaaladdan oo kale, uurka waxa uu u badan yahay in uu ku jiro meesha saxda ah ee ilmo -galeenka. Mararka qaarkood, si kastaba ha ahaatee, heerarka hCG ayaa si aan caadi ahayn kor ugu kaca, tanina waxay tilmaami kartaa jiritaanka uur ektoobiga. Dhakhtarka ku daryeela ayaa fasiri doona natiijooyinkan si uu si ammaan ah u qorsheeyo tallaabooyinka xiga ee daryeelkaaga.

HCG ayaa sidoo kale loo isticmaalaa in uu caawiyo go'aaminta habka ugu fiican ee lagu daaweyn karo uur ektoobiga. Natiijooyinkan waxaa qiimayn doona dhakhtarkaaga iyo sidoo kale calaamadahaaga iyo natiijooyinka sawirka ultrasound. Iyadoo ku xiran natiijooyinka, waxaa lagugula talin doonaa maareynta ugu habboon.

- Heerarka hormoonkaaga ayaa laga yaabaa inay u sii kordhaan si waafaqsan uur caadi u koraya oo ay weli tahay xilli hore in lagu arki karo sawirka. Haddii tani dhacdo, sawir waa in lagu celiyaa mar haddii heerka hoormoonkaagu dhaafo 1000iu/l ama 1500iu/l. Uurka waxaa laga yaabaa inuu ku jiro gudaha ama dibedda ilma-galeenka, waana sababta ay muhiim u tahay in la sameeyo baaritaan dabagal ah marka heerka hormoonku uu joogo heer caadiya.

- Heerarka hormoonkaaga ayaa laga yaabaa inay kala badh hoos u dhacaan, taas oo tilmaamaysa uur fashilmay oo ay u badan tahay in uu dhicisoobay.

- Heerarka hormoonkaaga ayaa laga yaabaa inay si tartiib tartiib ah hoos ugu dhacaan, in ay sidoodi ahaadan ama kordhaan taas oo tilmaami karta uur ektoobiga.

Haddii lagugu tuhmo inaad leedahay uur caadi ahaan koraya ama uur ektoobiga, waxaa caadi ahaan lagu sheegi doonaa inaad kusoo laabato isbitaalka si lagugu sameeyo baaritaanka ultrasound markale si la isugu dayo in la helo meesha uu uurku kujiro. Waqtiga baaritaanka ultrasound wuxuu ku xirnaan doonaa heerka hCG ee dhiiggaaga, sida lagu muujiyey natiijooyinka baaritaanka dhiiggaaga.

Haddii, nasiib-darro, heerarka hCG-gaagu hoos u dhacaan, halkii aad ku celin lahayd sawir ultrasound ah, waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto inaad timaaddo baaritaanno dhiig oo dheeraad ah ama inaad ku celiso